Nin Ummaddayda ka mida ayaa ilaahay ka soo dhex saarin khalqiga oo dhan maalinta qiyaame

Cabdillaahi Binu Camar Binu caas-Allaha ka raali noqdo isaga iyo Aabihiye ee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: Nin Ummaddayda ka mida ayaa ilaahay ka soo dhex saarin khalqiga oo dhan maalinta qiyaame, waxaana loo furin sagaal iyo sagaashan diiwaan oo mid walba le'eg yahay halka aragu gaaro, ka dib wuxuu dhihin ma wax aad inkirsan tahay oo malaa'igtayda wax qora ee xafadada ahi kugu dulmiyeen ayaa jira wuxuu dhihin: Rabiyow maya, waxaa lagu dhihin: cudur daar aad ku badbaaddo mahelin, wuxuu dhihin: Rabiyow maya, wuxuu Alle ku dhihin: bale waxaan kuu haynaa xasano, Maanta lagu dulminmaayo, waxaa loo soo saarin kaar ay ku qoran tahay: Ashhadu an llaa Ilaaha illallaahu wa Ashhadu ana Maxamedan Cabduhu wa Rasuuluhu, wuxuu dhihin Ilaahay: keen miisaankaaga: ninkii wuxuu dhihin: Rabiyow muxuu ka tarin miisaanka kaarkani waxa ku qoran diiwaanadaan illahay ayaa ku dhihin: lagu dulminmaayo, wuxuu yidhi: kafad ayaa la saarin diiwanadii, kaarkiina kafada kale, waxaa bidaya diiwaanadii, kaarkiina culays ayuu noqonayaa, shayna magaca Ilaahay kama cuslaado.

[Xadiis Saxiix ah] [waxaa wariyey tirmidi iyo ibn maajah]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in nin Ummaddiisa ka mida Ilaahey ka dooran doono khalqiga oo dhan Maalinta Qiyaamaha, waa loo yeerin si loo xisaabiyo, waxaa la soo hor dhigin sagaal iyo sagaashan diiwaan kuwaas lagu qoray camalkiisi xumaa ee uu ku sameeyey Aduunka, mid walbna dhererkiisu yahay inta araggu gaaro. Ilaahay casa wajala ninkaa wuxuu ku oran: waxa diiwaanadaas ku qoran miyaad wax ka diidan tahay? Miyey ku dulmiyeen malaa'igtayda xafadada ah ee wax qora? Ninkii wuxuu oran: maya Rabiyow. Ilaahay casa wajala wuxuu oran: camalkii aad aduunka ku samaysay ma u helaysaa wax cudur daar ah oo laguugu garaabi karo in ficilku kaaga dhacay si sahwi ah ama si gaf ah ama aqoon dari. Ninkii wuxuu oran: maya Rabiyow, ma haysto wax cudur daar ah. Ilaahay casa wajala wuxuu oran: bale, waxaan kuu haynaa xasano, maanta lagu dulminmaayo. wuxuu yiri: waxaa la soo saarin kaar ay ku qoran tahay: Ashhadu an laa Ilaaha Ilaa Allaah, wa ashhadu ana Maxamedan Cabduhu wa Rasuuluhu. Ilaahay wuxuu ku dhihin ninkii: imow miisaankaaga. Ninku wuxuu oran isagoo yaaban: Rabiyow!, kaarkani muxuu ka tarayaa miisaanka diiwaanadaan?! Ilaahay casa wajala wuxu ku oran ninkii: lagu dulminaayo. wuxuu yiri: waxaa kafad la saarin diiwaanadii kafada kalena waxaa la saarin kaarka, kafadii diiwaanada la saaray ayaa fudayd noqon, waxaana cuslaanaya kafadii kaarku saarnaa, markaasaa Ilaahay u danbi dhaafay.